

# Suuxdinta Guud

## Hagaha dhallinyarada

### Suuxdinta Guud

Suuxinta guud waa marka dhakhtarka suuxinta uu isticmaalo dawo (ama mararka qaarkood gaasta suuxinta) taasoo siinaysa xaalad hurdo oo qoto dheer, taas oo aanad waxba arki karin, maqli karin ama aanad dareemi karin. Tani waxay ka dhigan tahay inaad miyir daboolan tahay oo aanad toosin karin ilaa daawada suuxinta ay kaa dhamaato. Suuxdin guud waxay lama huraan u tahay habab badan oo ay ku jiraan qalliiinada iyo baaritaanno caafimaad qaarkood.

### Kooxda suuxdinta

Dhakhaatiirta suuxdinta ayaa ah dhakhaatiir tababar takhasus u leh adeegsiga dawooyinka suuxdinta si ay dadka si nabdoon oo badbaado leh u maraan qaliinada iyo/ama baaritaanada. Adiga iyo waalidkaa/daryeelahaaaga waxaad la kulmi doontaan dhakhtarka suuxinta kahor qalliiinka. Waxay kula heshiin doonaan qorshe ku saabsan suuxintaada iyo xanuun dhimistaada ka dib habraaca. Diyaar ayay u ahaan doonaan ka jawaabista su'aal kasta oo aad qabto. Xubnaha kale ee shaqaalahaa ayaa garab siin doona dhakhtarka suuxiyaha oo ay ka mid yihii gacan yare suuxiye, dhakhaatiirta waaxda qalliiinka (mararka qaarkood loo yaqaan ODPs) iyo kalkaaliyayaasha waarka

Waxa kale oo laga yaabaa in lagugu martiqado rugta qiimaynta qalliiinka ka hor dhawr toddobaad ama maalmo ka hor hawsha. Halkan kalkaalisada ayaa ku weydiin doonta su'aalo ku saabsan caafimaadkaaga waxayna diyaarin doontaa baaritaan kasta oo loo baahan karo. Tani waa fursad kale oo aad ku waydiin karto su'aalo kasta oo adiga iyo waalidkaa ama daryeelahaaagu aad yeelan karto.

### Oggolaanshaha

Dhakhtartka suuxiyaha ayaa kula shaqayn doona adiga iyo waalidkaa/daryeelahaaaga si aad u gaartaan qorshaha daryeelkaaga. Waxba kugu dhici maayaan ilaa qorshaha laga wada hadlo oo la isku raaco. Waxaa laga yaabaa inaad waydiiso su'aalo badan intaad jeceshahay si aad u fahanto wax walba oo dhacaya oo aad 'oggoshahay' (ku raac) qorshaha. Adiga ama waalidkaa/daryeelahaaaga ayaa saxixi doona dukumeentiga ogolaanshaha markaad ku qanacdid daryeelka suuxinta ee la soo jeediyay. Waalidkaaga ama daryeelahaaaga ayaa u baahan doona inuu ogolaado qalliiinkaaga haddii aadan da' ahaan gaarin inaad saxiido warqadda ogolaanshahaaga. Markaad sii weynaato waxaad awood u yeelan doontaa inaad go'aannadan wax weyn ku yeelato.

Waxaad ka akhrisan kartaa wax badan oo ku saabsan oggolaanshaha carruurta iyo da'yarta hoos:

England: <https://bit.ly/NHS-consent>

Scotland: <https://bit.ly/NHSinform-consent>.

## U diyaargarowga suuxintaada

### Caafimaadkaaga

- Waxaad u baahan tahay inaad caafimaad qabto intii suurtogal ah ka hor inta aanad marin suuxinta. Qaadashada hab nololeed caafimaad leh ka hor inta aanad qaadan daawada suuxinta waxay kaa caawin doontaa inaad si dhakhso ah u bogsato.
- Haddii aad awooddo, lixda toddobaad ee ka horreeya qallinkaaga isku day inaad iska ilaalso inaad ka neef qaadato qiiqa sigaarka dadka kale cabayaan. Sidoo kale waa muhiim inaadan cabbin sigaar caadi ah iyo mid elektron ah. Xasuusnoow inaad ku wargeliso qof kasta oo aad la nooshahay oo sigaar caba in uu ku cabo dibadda inta lagu jiro waqtigan. Joojinta ama yareynta cabista sigaarka waxyar ka hor qallinka waxay yarayn kartaa muddada aad isbitaalka ku sugnaanayso waxayna hagaajin kartaa bogsashada dhaawacyada iyo shaqada sambabada.
- Waa inaadan cabbin aalkolo maalmaha iyo toddobaadyada ka horreeya qallinka. Khamri badan ayaa sababi kara in beerkaagu aanu si fiican u shaqayn oo hoos u dhigo bogsashadaada iyo soo kabashadaada.
- Badbaadadaada awgeed, dhakhtarka suuxinta wuxuu u baahan yahay inuu ogaado haddii aad qaadatay kaniiniga ka hortagga uurka ama aad isticmaashay wax maandooriye madadaalo ah.
- Markay dhakhtarka suuxiyaha uu kuweydiyo inaad sigaar cabto, khamri cabto ama daroogo kale qaadato, fadlan si daacad ah uga jawaab. Waan ognahay in aysan habooneyn in laga hadlo arrimahan, sidaas darteed haddaad doorbideyso ineysan waalidkaaga ama daryeelahaagu aysan goob joog ahaanin waxaad codsan kartaa in aad la hadasho dhakhtarkaaga suuxiyaha kaligiis. Daacadnimada macnaheedu maaha inaad dhibaato geli doonto!
- Haddii aad qalliin marayso, waa inaad sidoo kale tixgelisaa fiirinta cuntadaada iyo heerarka jirdhiskaaga. Wixaad isticmaali kartaa wakhtiga inta aad sugayso qaliinka si aad naftaada u hesho qaabka ugu fiican ee suurtogalka ah, si aad u soo kabsato oo aad si degdeg ah ugu soo noqoto caadi. Wixaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sidaa ugu diyaargaroobi lahayd qalliin wabsaytkayaga kaas oo lagu heli karo luuqado kala duwan halkan:  
[www.rcoa.ac.uk/patientinfo/translations#languages](http://www.rcoa.ac.uk/patientinfo/translations#languages).
- Haddii aad qabto wax dhibaato caafimaad oo muddo dheer ah oo aan si fiican loo koontaroolin, adiga ama waalidkaa/daryeelahaaga waa in aad la xiriirtaan dhakhtarkaaga guud ama dhakhtarka takhasuska leh, ka hor taariikhda qallinka oo u sheeg in aad u baahan tahay suuxdin. Wixaad markaas kala hadli kartaa tillaabooyinka aad adiga iyo dhakhtarka suuxinta u baahan tiihin inaad qaaddaan si aad u badbaaddo intii suurtogal ah muddada aad isbitaalka ku jirto.
- Keen isbitaalka daawooyinka aad sida joogtada ah u qaadato. Shaqaalaha Isbitaalka ayaa kuu sheegi doona hadii aad joojineso daawowinka.
- Haddii ay suurtagal tahay, raadi macluumaad ku saabsan xasaasiyad kasta ama xubin kasta oo qoyska ka mid ah oo dareen-celin (xasaasiyad) ka qaaday suuxinta, si aad ugu sheegto dhakhtarkaaga suuxinta.

- Waa arrin caadi ah in uur laga baaro gabadh kasta oo ka weyn 12 jir iyadoo laga qaadayo kaadi. Tani waa sababta oo ah uurka, xitaa uurka hore, waxay saameyn kartaa habka suuxinta qaar ka mid ah u shaqeeyaan, markaa takhtarka suuxinta wuxuu u baahan yahay inuu taas ogaado. Daawaynta iyo baarista qaarkood waxay sidoo kale wax yeeli karaan ilmaha uurka ku jira. Dhakhaatiirta iyo kalkaliyayaasha caafimaadku waxay fahmeen in tani ay noqon karto arrin xasaasi ah oo laga wadahadlo, marka sida ugu badbaadsan uguna cadaalad badan waa in qof walba la tijaabiyo. Shaqaalaha Isbitaalka ayaa u bartay inay si degdeg ah oo qarsoodi ah u sameeyaan baaritaanadan.

Macluumaad dheeraad ah ayaa laga heli karaa halkaan:  
<https://flipbooks.leedsth.nhs.uk/LN005583.pdf>.

### **Cunista iyo cabbida kahor suuxdintaada**

- Isbitaalka waa inuu ku siyyaa tilmaamo cadcad oo ku saabsan goorta aad joojineyso cunista iyo cabitaanka qallinka ka hor.
- Waa muhiim in aad raacdil talooyinkan caafimaadkaaga dartiis. Haddii cunto ama dareere ku jiraan calooshaada inta lagu guda jiro suuxdinta, waxay ka soo bixi kartaa dhuuntaada kadibna geli kartaa sambabkaaga. Tani waxay sababi kartaa inaad ku margato ama dhaawac soo gaara sambabkaaga. Waxaa lagugula talin doonaa in aad qaadato cabitaan yar oo nadiif ah (inta badan biyo ama dareere kale) - tan ayaa ah mid ammaan badan illaa aad uga dhawaaneyso wakhtiga qaadashada daawada suuxdinta.

### **Dhar xirasho**

- Xiro dhar dabacsan oo waasac ah oo aadan dhib ku qabin lana dhaqi karo marka dambe. Iska ilaali xirashada dhar cusub ama qiimo leh in aad ku timaadid isbitaalka.
- Codso haddaad u baahantahay dharka hurdada , dacas iyo/ama go'.
- Soo qaado dhar aad guriga ku aaddo hadhow.
- Waxaa lagaa codsan karaa inaad gashato goonnada isbitaalka.
- Badanaa waad xirnaan kartaa kastuumadda ama hoos gashiyadaada markaad hoolka qallinka galeysa, oo ay kujiraan keeshaliga haddii uusan lahayn biro, laakiin waydii kal-kaaliyahaaga. Kastuumada waxaa loo baahan karaa in lagaa siibo mararka qaar inta lagu jiro qallinka.
- Waxaa dhacda in dhakhtarka qallinka uu ka xiilo timaha goobta la qalayo, laakiin wuu kuu sheegi doonaa inteysan galin kahor.
- Waxaa lagaa codsan karaa inaad xirato iskaalsho dhaadheer oo jilicsan intaadan qallinka galin kahor. Tani waxay kaa caawin kartaa in qul-qulka dhiigaaga ee lugaha si aysan xinjiro dhiig uga sameysmin.

### **Dhago-dhagaha iyo waxyaabaha laysku qurxiyo (meekap ka)**

- Fadlan guriga kagasoo tag alaabtaada isku-qurxinta, dhago-dhagaha , sida dahabka iyo kuwa kale. Haddii aadan iska bixin karin alaabtaada dhago-dhagaha , waxaa macquula iney ku daboolaan Koolo si aysan waxyeelo usoo gaarin jirkaaga ama alaabtaada.

- Fadlan ka fogow xirashada isqurxin, baarar been ah iyo nooc kasta oo cidiyaha lagu qurxiyo (cidiyayaal been abuur ah, jeel, akril, cidiyo caseyn, iwm). Baararka beenta ah waxay dhaawici karaan indhahaaga markaad huruddo iyo qurxinta ciddiyaha waxay joojin kartaa la socodka qalabka inay si sax ah u shaqeeyaan. Kuwaas waxaa laga yaabaa in ay u baahdaan in ay kaa saaraan shaqaalaha isbitaalka oo ay daahiyaan daaweyntaada.

### **Isdhaafinta waqtiga**

- Waxaa dhici karta inaad waxbadan sugto
- Horay u soo qaado waxyalo aad waqtiga isku dhaafiso (tusaale, buug, joornaal ama moobilkaaga gacanta). Fadlan hasoo iloobin eerfoonkaaga iyo jaarjarkaaga.
- Fadlan iska ilaali inaad sigaar cabto ama xanjo calaliso inta aad sugeyso qalliiinka, iyo inaad si degan shuruucda wax cunnida iyo cabbida raacdoo.

### **Qaadashada suuxisada**

- Dhakhtarka suuxiyaha ah wuxuu inta badan kubilaabi doonaa suuxisada qol kuxiga masraxa qalliiinka, oo lagu magacaabo qolka suuxisada. Waqtiyada qaar waxey kadhici kartaa qolka lagu qabanayo qalliiinka/baaritaanka.
- Dhaqtarkaaga suuxiyaha ah wuxuu inta badan ka bilaabi doonaa suuxsiintaada isagoo xoogaha dawo kaa siinaya kaanoolka (Hoos ka fiiri macluumaad badan oo tan kusaabsan). Sida aan badneyn, waxey ku weydiin doonaan inaad neefsato naqas u uraya xoogaha sida biiraha qalinka ah. Takhtarkaaga suuxinta ayaa adiga iyo waalidkaa ama daryeelahaga kala hadli doona habka adiga kugu habboon.
- In dawada lagaa siiyo kaanool ka dhexdiisa waa wadada ugu dagdagga badan oo lagugu suuxinayo. Haddii aad neefsato gaaska, waxaad lahaan doontaa kaanool laguu xiri doona marka aad hurudo, si uu dhakhtarka suuxiyaha uu kuu siiyo daawo suuxiso dheeraad ah, xanuun baabi'iyeyaa ama dawooyin kale iyo dareerayaal inta lagu guda jiro qalliiinkaaga. Labada qaab midkoodba wuxuu kaayeeli karaa inaad dareento wareer (dawakhad) kahor inta aadan miyir beelin.
- Haddii aad rabto, waalidkaaga/daryeelahaga laga yaabe inuu kula joogi karo illaa aad ka hurudo. Taas kadib, waxey kugu sugi karaan qolka sugitaanka ama waarka. Taa badalkeed, kalkaaliso ayaa kula joogi doonta marka ey suuxisadu bilaabeysos howsheeda.

### **Kaanool**

- Kaanoolku waa tuubo dhuuban, dabacsan oo balaastig ah kaasoo lagaliyo xidid, inta badan gacantaada dhabarkeeda kore.
- Waxaa dhici karta in lagu siiyo kareem kabuubiye ah ama buufin qaboow oo gaar ah gacantaada dhabarkeeda si loo yareeyo xanuun kasta marka kaanoolka la galinayo.
- Irbad dhuuban ayaa loogu talagalay in kaanoolka la dhexdhigo, kadib irbadda ayaa la saarayaa isla markiiba.
- Isla marka kaanoolka laguugu xiro, dawadaada waa lagaa dhix siin karaa adigoon isticmaaleyn wax irbado ah Xiliyada qaar tani waxey sababi kartaa dareen yar oo qabow ah, xanta xanto ama xanuun iska dhexdhixaad ah
- Kaanoolkaaga ayaa inta badan meesha looga tagaa qalliiinka kadib haddii aad lacalla u baahato xanuun baaba'iye, dareerayaal ama dawooyin kale hadhow.

## Inta lagu guda jiro suuxdinta

- Dhakhtarka suuxiyaha ayaa kula joogi doona markasta.
- Shaqada suuxiyuhu waa inuu si amaan ah kuu ilaaliyo oo uu kusiiyo suuxiso kugu filan iyo xanuun baab'in si uu kugu hayo miyir la'aan illaa qalliiinku dhamaado.
- Takhtarka suuxinta ayaa si dhow kuula socda inta lagu jiro qalliiinka (oo ay ku jiraan cadaadiska dhiiggaaga, garaaca wadnahaaga iyo neefsashadaada).

## Toosidda markaas kadib

- Qalliiimada iyo baaritaanada ayaa dhamaan qaadanaya dhererka waqtii kala duwan, laakiin marka uu dhamaado hab-raaca, dhakhtarka suuxiyaha wuxuu joojin doonaa inuu kusiiyo dawooyinka suuxdinta. Tani waxey kuu ogolaan doontaa inaad toosto shan daqiiqo kadib meelahaas.
- Waxay u badantahay inaad kusoo dhex toosto qolka kabashada laakiin waxaa laga yaabaa inaadan xasuusanin dhowrka daqiiqo ee ugu horreeya ama aad si sax ah ugaran weyso meesha aad joogto. Xubin tababaran ee kooxda masraxa, inta badan kalaalisada kabashada, ayaa ku xanaaneyn doonta.
- Sida aad dareemeysa markaas kadib waxey kuxirnaan doontaa nooca hab-raaca iyo suuxisada aad qaadatay. Dadka qaar waxey yeelan karaan dhuun qalleyl xanuun leh, madax xanuun, ama xoogaa hurdo. Takhtarka suuxinta ayaa sida caadiga ah ku siin doona dawo uu kaa ilaaliyo inaad dareento ama jirrato, laakiin sidoo kale waxaad dareemi doontaa ka dib markaad wax cabto ama aad wax cunto. Mararka qaarkood waxaa laga yaabaa inaad dareento qabow ama qarqaryo. Haddi ay sidaas tahay, waxa lagu siin doonaa buste si ay kuu diiriyan.

## Daawaynta xanuunka

- Waa muhiim in laga hortago oo la daweeyo xanuunka, dadka qaar (iyo noocyada qalliiinka qaarkood) waxay u baahan yihiiin Xanuun baabi'eye ka badan kuwa kale.
- Way fududahay in la daweeyo xanuunka ka hor inta aanu xumaynin, markaa waa inaad weydiisataa kalkaalisaada soo kabsashada ama suuxiyahaaga caawin mar kasta oo aad bilowdo inaad dareento raaxo darro, halkii aad sugi lahayd ilaa uu ka sii darayo.

## Dib ugu noqo Hadalkiii hore

- Waxaa laga yaabaa inaad marka hore dareento daal badan.
- Haddii aad wax dhibaato aad qabto, usheeg qof kale si ay kuu caawiyaan. Waxaa laga yaabaa in aad qeeylo-dhaansato ama aad weydiiso waalidkaa/daryeelahaaga inay kuu raadiyaan kalkaaliso.
- Sida ugu dhakhsaha badan ee aad wax u cuni karto ama aad u cabbi karto mar labaad waxay kuxirantahay nooca nidaamka iyo xanuun baabi'iyaha ee aad qaadatay. Kalkaalisaadaada ama Dhakhtarka suuxiyaha ayaa kula talin doona.
- Wuxaad joogi doontaa cusbitaalka ilaa ad ka bogsaneeso oo ad guriga ka'adeeso. Habraacyo badan kadib waxaad aadi kartaa guriga isla maalintaas haddii ad caafimaad qabtid oo nidaamka uu yahay mid toos ah.

## Khatarta la xiriirta suuxintaada

Dawooyinka suuxinta casriga ah aad bay badbaado u tahay. Waxaa jira qaar ka mid ah waxyeelooyinka caadiga ah ee ka yimaada daawooyinka suuxdinta ama qalabka loo isticmaalo, kuwaas oo aan badana ahayn kuwo halis ah ama aan sii waarin.

Dhakhtarkaaga suuxinta ayaa kaala hadli doona adiga iyo waalidkaaga ama daryeelahaaga halista ay rumeysan yihiiin inay aad kuugu muhiimsantahay. Waxedaad ka akhriyi kartaa faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan khataraha la xiriira suuxinta boggayaga kaas oo aad ka heli karto luuqado kala duwan halkan:

[www.rcoa.ac.uk/patientinfo/translations#languages](http://www.rcoa.ac.uk/patientinfo/translations#languages).

## Suuxinta goboleed iyo mid deegaan

- Mararka qaarkood waxaad dooran kartaa inaad soo jeeddo inta lagu jiro qaliinka. Haddii ay taasi suurtogal tahay, dhakhtarkaaga qallinka iyo/ama Dhakhtarka suuxiyaha ayaa kaala hadli doona adiga iyo waalidkaa/daryeelahaaga. Xaaladdaas, waxaa lagugu duri karaa cirbad suuxdineed si loo kabuubiyo qayb ka mid ah jirkaaga si aadan xanuun u dareemin.
- Haddii aad u malaynayo inaad jeelaan lahayd inaad soo jeeddo, waxaad tan kaga hadli kartaa qiimayntaada.

## Haddii aad rabto inaad wax badan ka ogato

- Waxedaad macluumaad dheeraad ah ka heli kartaa Wabsaytkayaga kuwaaso kuugu diyaara luuqado kala duwan halkan:  
[www.rcoa.ac.uk/patientinfo/translations#languages](http://www.rcoa.ac.uk/patientinfo/translations#languages).

## Afeefasho

Waxaan aad ugu dadaalaynaa in macluumaadka ku jira qoraalkan yar ay noqdaan kuwo sax ah oo ilaa hadda, laakiin annagu ma ballan qaadi karno tan. Uma fileynno macluumaadkan guud inuu daboolayo dhammaan su'aalaha aad qabtid ama waxkasta oo aad kuugu muhiim kuu ah. Waa inaad kala hadasho xulashooyinkaaga iyo wixii walwal ah ee aad ka qabto kooxda caafimaadkaaga, adoo u isticmaalaya buug-yaraahaan sidii hagge ahaan. Buug-yaraahaan keligiis looma tiixgalin doono talo ahaan. looma isticmaali karo ganacsi ahaan ujeedo. Qiimayn buuxda, fadlan halkaan riix ([www.rcoa.ac.uk/patient-information/translations/somali](http://www.rcoa.ac.uk/patient-information/translations/somali)).

Dhamaan turjumaadahan waxaa bixiya Translators without Borders' (Turjubaanada bilaa xuduudaah') bulshada turjubaanka. Tiayada tarjumaadahaan waxaa loo hubiyaa inay ka dhigayaan tarjumaadaha sida ugu macquulsan, laakiin waxaa jirta halis ah khaladaad iyo marin habaabinta macluumaadka qaar.

## Noo sheeg maxay kula tahay

Waxaan ku soo dhawaynaynaa talooyinka lagu hagaajinayo buug-yarahanta.

Haddii aad haysid wax faalin ah oo aad jeceshahay Inaad nala waadaagto fadlan ku soo hagaaji: [patientinformation@rcoa.ac.uk](mailto:patientinformation@rcoa.ac.uk)

### Royal College of Anaesthetists

Churchill House, 35 Red Lion Square, London WC1R 4SG  
020 7092 1500

**www.rcoa.ac.uk**

Daabacaadda Afaraad, Oktoobar 2024

Buug yarahsan waxaa dib u eegis lagu samayn doonaa saddex sano gudahood laga bilaabo taariikhda la daabacay.

© 2024 Royal College of Anaesthetists and Association of Paediatric Anaesthetists of Great Britain and Ireland

Buug-yarahsan waxaa lagu nuqlulan karaa ujeedada soo saarista agabka macluumaadka bukaanka. Fadlan xigasho asalka ah sii. Haddii aad dooneysid in aad ku isticmaasho qayb ka mid ah buugyarahsan daabacaad kale, waa in aad ku muujisaa qaybta horudhaca astaamaha, sumadaha iyo sawirrada aad ka reebtay. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan nala soo xirir.